



Allaha lacnado Yuhuud iyo Nasaaro, qubuuraha nabiyaooda ayey masaajid ka dhigteen

Caa'isha iyo Cabdullaahi Binu Cabaas Allaha ka wada raali ahaadee waxay yiraahdeen: Markuu ku soo dagay Rasuulka Ilaahay scw sakaraadka geeridu wuxuu bilaabay inuu wajiga iska saaro cimaamad uu lahaa, markuu sakaraadku ku sii kordhana wuu iska qaadaayey, wuxuu yiri isagoo xaaladaa ku sugan:" Allaha lacnado Yuhuud iyo Nasaaro, qubuuraha nabiyaooda ayey masaajid ka dhigteen" wuxuu ka digay waxay sameeyeen.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Caa'isha iyo Cabdullaahi Binu Cabaas Allaha ka raali ahaadee waxay inoo sheegeen in markii Rasuulka Ilaahay uu ku dhacey sakaraadku, uu bilaabay inuu wajiga iska saaro maro, marka neeftu ku dhagto sakaraadka awgii uu iska qaadayey, wuxuuna dhahayey isagoo xaaladaa adag ku jira: Allaha lacnado Yuhuud iyo Nasaaro oo ha ka fogeeyo naxariistiisa, sababtoo ah waxay ka dul dhiseen qubuuraha nabiyaooda masaajid, haduuna arinkaasi khatar wayn ahayn Nabiga oo xaalad sakaraad taagan muuna sooqaadeen, sidaa darteed wuxuu ka reebay Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiiye- ummaddiisa inay sidasoo kale la yimaadaan oo ay u ekaadaan Yuhuuda iyo Nasaarada, waayo waa ficil yuhuud iyo nasaaro ay ku tilmaaman yihiin, waana wax u jiidi kara qofka inuu Ilaahay u shariig yeelo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3330>

